


Kitaabka Quduuska ah ee
loogu talo galay Carruurta
Soo-jeedinayaa

Samaaritaankii Wanaagsanaa



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: M. Maillot, Lazarus
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: Ruth Klassen, Sarah S.

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2025 Bible for Children, Inc.

Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato
qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.




"Macalin! Maxaa igu waajib ah inaan sameeyo si aan u helo nolosha weligeed ah?" ninka su'aashan weyddiinaya wuxuu ahaa garyaqaan doonayay inuu dayo oo uu xujeyo Ciise.

"Sharciga


Ilaah muxuu ka yidhi?" ayaa Ciise ugu jawaabay.



"Jeclow Ilaah iyo deriskaaga,"
ninkii wuxuu yidhi.
"Wa'ayo desiskayga"
ayuu weyddiiyey.



Ka jawaabidda su'aasha ninkan, Ciise wuxuu u
sheegay sheeko ku saabsan nin ku safrayay
waddada u dhaxeeyso
Yerusaalim iyo
Yerixoo. Ninkii
waxaa soo weeraray
tuugo.




Ninkii wax walba oo uu watay way ka dhaceen, xitaa
dharkii uu gashanaa musaafurkii way ka furteen
nasiib darro. Oo weliba six un bay u garaaceen
oo dhaawacdeen, waxayna kaga
tageen waddada

dhinaceeda isagoo dhiman
oo aan nooleyn.



Nasiib wanaag iminka waxaa waddadii
soo maray nin wadaad ah, Runtii
wuu caawin karay ninkii. May!
Markii uu arkay ninkan
dhiig
baxay,




wuu iska
dhaafay oo waddada
dhankeeda kale ayuu maray.




Durbadiiba raadkii waxaa soo maray oo ku soo
beegmay qof kale. Wuxuu ahaa nin reer Laawi
ah oo macbudka ka caawiya wadaaddada.

Wuu eegay oo wuu ka tagay ninkii
dhaawacnaa

isagoo inaba caawinin.



Ugu dambayntii, nin reer Samariya ah
ayaa sii maray waddadii oo u yimid.
Israa'iliyiintu ogow aad bay u neci
jireen reer Samaariya.



Dadkii dhageysanayey sheekadii Ciise
maysan ka filayn in qof rermaariya ah
uu halyay noqon karo. Laakiinse wuu
ahaa. Samaaritankii





wuu daryeelay, oo
u joogsaday inuu caawiyo ninkan.



Samaaritaankii ninkii
wuu u leexday, oo uu si
fiican daaweeyey oo
uu faashad ku xidhay
dhaawacyadiisii.





Hoteel waddada ku ag yaalay, ayuu
ka xanaaneynayay habeenkaa oo idil.




Aroortii ayuu siiyey ninkii hoteelka
lahaa lacagtii uu ku dhaqaalayn lahaa
musaafarkan ilaa uu
ka bogsoonayo.



Sidaa bayna ku dhamaatay sheekadii.
Ciise ayaa weyddiiyay, "Kumaa deris
la ah ninkan dhaawacan?"






Garyaqaankii wxuu ugu
jawaabay, "Deriskiisu
waa ninkan reer
Samaariyaha ah
ee u naxariistay."



"Tag oo sidiisoo kale samee," buu Ciise ugu jawaabay.
Dersiku waa cid walboo caawimaad u baahan.

Waxaynu tusi karnaa
jacayl aan ku caawin
karno baahidooda.

Taasi Ilaah
bay raalligelisaa.



Samaaritaankii Wanaagsanaa

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Luukos 10


"Erayadaada furniinkoodu wax buu
iftiimiyaa." Sabuurka 119:130



Dhammaad



46



60



Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Cigaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro cigaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16

